# HESHIIS u dhexeeya Qabanqaabiyaasha koorska iyo Kaqaybqaa-teyaasha koorska sida ku xusan qodobbka § 8 farqadiisa 4 ee nidaamka caawinaada luqada Jarmalka (DeuFöV)

Fududaynta luqada awgeed kaliya ayaa qoraalkaan loo isticmaali doonaa qaabka ragga. Si kastaba ha noqotee, dadku had iyo goor waxaa loola jeedaa lab iyo dhadig labadaba.

**U dhexeeya**

| |
|---|
| Magaca qoyska, Magaca shakhsiga iyo taariikhda dhalasho ee kaqaybqaataha koorska |

**iyo**

| |
|---|
| Magaca iyo ciwaanka Qabanqaaybiyaha koorska |

**heshiiska soo socda ayaa laysku afgartay:**

## 1. Bixinta kharashka

Kaqeybgalka koorsada luuqadda xirfadeedku waa lacag la'aan.

Kuwaas waxaa ka reeban shaqaalaha aan la siin kaalmada nolosha marka loo eego SGB II, SGB XII ama AsylbLG ama aan xaq u lahayn lacagta la siiyo dadka aan shaqo haysan, kuwa aan waxbarasho-xirfadeed ku jiran sida waafaqsan qodobbka § 57 farqadiisa 1 ee buugga sharciga dadwaeynaha SGB III ama talaabadda la qabsashada ku jira iyo kuwa dakhligooda canshuurta sanadlaha ah shaqsi ahaan ayaa loo qiimeeyay lacagta 20.000 € ama wadarta lamaane dakhligooda canshuurta ku waajib oo gaaraysa 40,000 €. Dadkani waa inay kharashka bixiyaan. Qabanqaabiyeha koorsadu waa inuu kaqeybgalayaasha ogeysiiyaa qaanuunka kharash bixinta. Kharashka waa in la siiyaa qabanqaabiyaha koorsada kahor bilowga koorsada ee dhammaan fasallada.

Shaqaalaha sidaa darteed ka qeybqaata koorsada luuqadda xirfadeed si bilaash ah sababtoo ah dakhligooda canshuurta sanadlaha ah ee canshuurtka layska qaado oo aan ka badnayn xaddidaada kor lagu soo xusay, waxaa waajib ku ah inay bixiyaan kharash haddii ay iskooda u joojiyaan koorsada luqadda xirfadeedka . Shaqaalaha kaqeyb galaya waa inuu u keenaa cadeymo raad raadin hay´adda qaxootiga hadii ay dhacdo joojin aan sabab laheyn. Buugaagta wax laga barto waxaa kaqeybgaleyaasha si lacag la'aan ah ku siinaya bixiyaha koorsada.

## 2. Kharashka gaadiidka

Ka qayb-qaateyaasha la siiyo:

- Lacagta dadka aan shaqayn I (SGB III)
- Lacagta dadka aan shaqeeyn II (SGB II)
- Lacagta dadka ceerta qaata (SGB XII)
- Mucaawinada dhalinyarada aan qaangaarin (SGB VIII, oo lagu bedelay lacagta qaxootiga la siiyo)

- Lacagta qaxootiga la siiyo (AsylbLG – Sharciga lacagta qaxootiga) ama
- Caawinaada waxbarasho-xirfadeedka sida ku xusan qodobbka § 56 ee buugga sharciga dadwaynaha SGB III

waxay heli karaan deeq loogu talagalay kharashaadka safarka ee lagama maarmaanka ah. Haddii lacagta deeqda la joojiyo koorska intuu socdo, ka-qaybtqaatuhu waa inuu si degdeg ah u wargeliyaa hay´ada qaxootiga Bundesamt.

Kabitaan hal mar ah ayaa la bixin doonaa haddii jidka ugu gaaban ee ka baxa guriga ee loo tago xarunta tababarka iyo / ama goobta imtixaanka shahaadadu ay ugu yaraan tahay 3 kiiloomitir. Codsiga kaalmada safarka waa in lagu soo gudbiyaa bixiyaha kooraska. Haddii loo diido codsiga wuu ka ashtakoon karaa Codsiga qoraalka ah waa inuu helaa xafiiska Federaalka inta lagu gudajiro muddada koorsada. Haddii dalabka kharashyada safarka uu gaaro Xafiiska Federaalka dhammaadka koorsada, waa la diidi doonaa. Ka qaybqaatahu wuu diidi karaa diidmada ama wuxuu wakiilnimo siin karaa qabanqaabiyaha koorsada awood qareen si uu racfaan uga qaado ka soo horjeedka ka qeybqaataha.

Haddii kaalmada safarka ay ogolaato hay´adda socdaalka iyo qaxootiga, waa mid ansax ah booqashada koorsada oo dhan. Oggolaanshuhu isma beddelayo markii sicirka la beddelo. Haddii goobta degenaanshaha ama xarunta tababarka wax iska beddelaan, oggolaanshuhu wuxuu noqonayaa mid aan ansax ahayn. Haddii loo baahdo, markaa codsi cusub waa in la sameeyaa.

## 3. Daryeelka caruurta

Haddii aad uga baahan tahay caawimaad xagga abaabulka daryeelka ilmaha, fadlan la xiriir qabanqaabiyaha koorsada.

## 4. Biloowga koorska

4 toddobaad gudahood markii la isdiiwaangaliyo, ka qaybgalaha waa inuu bilaabaa koorso luqadeed. Hadeysan koorso jirin qabanqaabiyeha koorsadu waa inuu u gudbiyaa kaqayb-qaataha qabanqaabiye koorso kale oo bixiya koorso ku habboon. Qabanqaabiyeha koorsada ayaa ka qayb-qaataha dib ugu celiya warqada xaquuqda kaqayb-qaadashada wuxuuna ku ogeysiinayaa hay´adda socdaalka ku wareejinta qabanqaabiyaha koorso kale.

Ka qaybgalaha waa inuu si dhakhso leh ugu wargaliyaa isbeddelada cinwaanka bixiyaha koorsada. Beddelka kooraska ayaa suurtagal ah keliya haddii ay dhacdo xaalad adag. Dhibaato waa: tusaale ahaan, haddii iskuulk guuritaanka  kadib meeshuu degentahay ee cusubi la gaari karo kaliya 90 daqiiqo kadib. Ka qeybqaataha waa in uu codsadaa in la beddelo dabcan hay´aada socdaalka iyo qaxootiga isaga qaabilsan.
Haddii ay tahay in koorsada uu bixiyaha koorsada joojiyo, qabanqaabiyeha koorsadu waa inuu ka qeybgalayaasha u diro koorso kale oo ku habboon.

## 5. Dhaqanaka inta casharka lagu gudo jiro

Fasalada waa in looga qeybgalaa si joogto ah oo waqtile ah. Ka qaybqaataha ayaa oggolaaday inuu si firfircoon uga qaybqaato qaabeynta casharka. Nidaamka xarunta ee qabanqaabiyaha waa in la ilaaliyaa. Ku xadgudubka nidaamka xarunta ayaa u horseedi kara ka saarista casharrada.

## 6. Maqnaashaha

Inta lagu jiro waqtiga casharka ma jiro fasax shaqsi ah oo la qaadan karo.

Joojinta koorsada luqadeed ee kaqeybgalayaasha waxaa isla markiiba hay´adda socdaalka iyo socdaalka u soo gudbiya qabanqaabiyaha iyo xafiiska bixiya warqada xaquuqda kaqaybqaadashada. Intaas waxaa sii dheer, qabanqaabiyeha koorsada wuxuu ogeysiinayaa xarunta shaqada dadka lagu qasbay inay kaqeybgalaan xarunta shaqada isla marka haddii ay halis gasho in guul laka keeno imtixaanka casharada sabab habsaamid iyo maqnaasho awgood (oo ku xirrirsan qodobbka § 9 farqadiiasa 5 sadarka 2 ee nidaamka caawinada luqada af-jarmalka DeuFöV).

Waxaa jira shuruudo wargalin oo waajib ku ah qabanqaabiyeyaasha koorsada gaar ahaan, haddii kaqeybgaleyaasha:

- maalinta bilawga koorsada cudurdaar la'aan
- Cafis ama cudur daar la'aan ugu yaraan saddex maalmood oo isku xigta oo fasalka laga maqnaado
- in kabadan 20% casharada oo aan la aadin.

Haddii kaqeybgalahu ka maqnaado 30% casharadii isagu ama iyadu ay rabto inay kaqaybgasho koorsada luqadda xirfadeed, dhammaystirta ku guuleysiga koorsada dib dambe looma filayo. Xaaladdan oo kale qabanqaabiyaha koorsada waa inuu u sheegaa joojinta ka-qeybgalaha Hay'adda Shaqada ama Xarunta Shaqada iyo hay´adda qaxootiga.

Haddii ka qaybqaataha fasalka ka maqnaado, raali gelin waa inuu had iyo jeer kee sidii caddaysan. Cadeynta, Tusaale ahaan Shahaadada, waa in si dhakhso leh loogu gudbiyaa qofka haysta koorsada. Sababaha soo socda awgood buu kaqayb-qaataha casharka kaga maqnaan karaa:

| | |
|---|---|
| **Cuddur** | **Ilaa iyo maalin koorso ah**, haddii kaqaybgalayaashu ku wargaliyo qabanqaabiyeyaasha koorsada xanuunka si toos ah / af ahaan ah (qabanqaabiyeha koorsadu wuxuu soo saari doonaa warbixin qoraal ah) ama qoraal ahaan bilowga cudurka.<br>**Laga bilaabo maalinta labaad** waa in warqada dhaqtarka uu keenaa |
| **Daryeel ilmo jiran oo aan gaadhin da'da 12, haddii aanu jirin daryeele kale** | Soo bandhigida shahaado caafimaad oo ku saabsan daryeelka lagama maarmaanka u ah ilmaha, oo ansax ah laga bilaabo maalinta koowaad ee koorsada |
| **Luminta lama-filaanka ah ee daryeelka ilmaha ee cunugga aan weli gaadhin da'da 8 (tusaale ahaan daryeelaha ilmaha ayaa buko)** | Markii uu xaqiijisy masuulka |
| **Baaqashada daryeelka caruurta ama iskuulka hadii uu maamulka dawlada ee gobolka uu amro xiritaanka iskuulka / xarunta xanaanada caruurta iyo canuga la daryeelayo uusan wali gaarin da'da 12** | **Haddii la soo gudbiyo caddey ku habboon ee xiritaanka (looma baahna haddii ay tahay xeer xiritaan ee khuseeya waddanka oo dhan ama dhammaan degmada ama xaafada)** |

| | |
|---|---|
| **Daryeelka qof qaraabo ah ilaa oo isagu / iyadu ku wada nool tahay isla guriga ka qaybgalaha** | Marka la soo bandhigo shahaado ku saabsan baahida loo qabo in la daryeelo ehelka |
| **Guurka kaqeyb galayaasha** | **Laba maalmood oo koorsada,** marka la soo bandhigo caddeyn (caddeyn guur) |
| **Fasaxa hooyonimada** | Soo bandhigida caddeyn munaasib ah (tusaale ahaan caddeyn caafimaad) |
| **Dhalmada xaaska ama lammaanaha kaqeyb galayaasha** | **Laba maalmood oo koorso ah**, marka la soo bandhigo caddeyn ku habboon (tusaale, caddeyn caafimaad, caddeyn dhalasho) |
| **Geerida xaaska, lammaanaha nolosha wadaaga sida sharciga ku xusan , canug ama waalid** | **Illaa laba maalmood oo koorso ah** markii la soo bandhigo xaqiijin<br>**Ilaa shan maalmood oo koorso ah** haddii aaska lagu qabanaayo dibedda |
| **Casuumaad ka socota hay´adaha dawlada (tusaale ahaan hay'adda ajnabiga / maxkamadda)** | Marka la soo bandhigo caddeyn ku habboon |
| **Maqnaanshaha uu oggolaaday adeegbixiyaha** | Marka la soo bandhigo caddeyn ku habboon |
| **Codsiyada fasaxa ee uu ogolaaday loo shaqeeyuhu shaqaalaha iyo tababarayaasha** | Koobiga codsiga fasaxa la ogolaaday |
| Amarka ku saabsan karantiil guri oo ay sameeyeen maamulka maxalliga ahi ee qaabilsan | Marka la soo gudbiyo caddeynta habboon (waa la bixin karaa haddii amarka cinwaanka la deggan yahay la og yahay inuu ansax yahay) |
| Kaqaybqaadashada tijaabada si loo go'aamiyo haddii aad qabto cudurka COVID-19 | **Maalinta baaritaanka iyo maalmaha natiijada baaritaanka la sugayo**, waxaa la soo bandhigayaa caddeyn la xiriirta |
| Ka mid ahaanshaha kooxda halista ah ee, marka laga eego dhinaca caafimaadka, ay leedahay soojireen aad u daran oo jirro ah oo la xiriirta COVID-19, waa haddii aysan jirin wax dalab ah oo kaqeybgal fasal dalwad ah | Marka laguu soo bandhigo caddeyn caafimaad oo sheegaysa inaad ka tirsan tahay kooxda halista u dhiganta<br>Fiiro gaar ah: Kaqeybgalka koorsada joogitaanka jirka waa ikhtiyaari, xitaa haddii aad buuxiso shuruudaha ka mid noqoshada kooxda halista. |

Qabanqaabiyeha koorsadu wuxuu hayaa caddeyn caafimaad ama caddeyn kale oo caddaynaysa maqnaanshaha.

## 7. Shahaadada imtixaanka

Qabanqaabiyeha koorsada wuxuu siiyaa ka qeybgalayaasha imtixaanka shahaadiga ah kaqeybgale kasta ee koorsooyinka luqadda xirfadda. Koorsooyinka maadooyinka qaaska ah tusaale ahaan: Ganacsiga ama waxsoo-saarka / farsamada ayaa la soo saaraa halkii laga siin lahaa shahaado soo xaadiris oo ay la socoto macluumaad ku saabsan horumarka waxbarasho ee la gaadhay. Haddii imtixaanka shahaadada lagu guulaysan hal jeer ayaa lagu celin karaa.

Ka qeybqaatahu wuxuu ka codsan karaa xafiiska shaqada ama xarunta shaqada haddii uusan ku guulaysan imtixaanka inuu ku celiyo koorsada hal mar.

Imtixaanka shahaadada iyo ku soo celinta imtixaanka shahaadada waa u bilaash ka qeybqaataha.

Kaqeybgale aan ku guulaysan imtixaanka ku celcelinta kadib wuxuu ka helayaa ka qabanqaabiyaha koorsada shahaadada imaanshaha, kaas oo ka kooban macluumaad ku saabsan horumarka waxbarasho ee la gaarey. Nuqul ka mid ah shahaadada imaanshaha waa inuu u diraa qabanqaabiyeha koorsada hay´adda qaxootiga iyo socdaalka iyo sidoo kale xafiiska shaqada ama xarunta shaqada. Isla sidaas ayaa lagu dabaqaa natiijooyinka imtixaanka shahaadada.

## 8. Ururinta Macluumaadka

Xogta kaqeybgaleha waxaa loo isticmaali karaa oo keliya iyadoo loo hoggaansamayo qawaaniinta (ay kujirto ilaalinta xogta) xeerarka waxqabadka saxda ah iyo biilasha koorsooyinka luqadda xirfadda leh waxaana loo gudbin karaa hay'adaha la oggol yahay (tusaale ahaan Xafiiska Federaalka, Wakaaladda Shaqada, hay'adda amniga bulshada ee aasaasiga ah). Kuwa kale, gaar ahaan ujeedooyin ganacsi, xogtan looma adeegsan karo loomana gudbin karo dhinacyada saddexaad ee aan idman.

Xogta kaqeybgaleyaasha waa iney tirtiraan koorsada ugu dambeyn shan sano kadib.

Ka qaybqaatahu wuxuu xaq u leeyahay inuu ffiriyo dukumiintiyada la xiriira shaqsiyadiisa.

,

Degmada, Taariikhda

__________________________________
Saxeexa kaqeybgalaha
(Fadlan la soco: Saxiix la´aan ka qaybqaadashada idman suurto gal maaha. Kaqeybgalayaasha kayar da'da 18 saxiixa waalidkood ama wakiil sharci ayaa looga baahan yahay.)

__________________________________
Saxiixa qabanqaabiyaha koorsada